Guryo-Magaaleedka Glendale

http://www.mphaonline.org/glendale-townhomes/

Guryo-Magaaleedka Glendale waa hanti ay leedahay Hay'adda Guryeynta Dadweynaha ee Miniyaabolis (MPHA) ee xaafada Prospect Park ee Miniyabolis. Waxayna ka kooban tahay 184 Guryo loogu talagalay qoysaska, oo guud ahaan 28 dhismayaal ku dulyaan goob cabirkeedu yahay 14.5 hectar. Marka laga reebo qaarka guryaha labo-labada dabaq ah, iyo guryaha qoysaska kaliyah ee aan leenahay, waa hantida ugu fac weyn marka ay noqoto hanti maalgelinta faylalka kala duduwan ee MPHA lee dahay, waaxaana la dhisay 1952.

Guryo-Magaaleedka Glendale waxey si hooy ahaan iyo bulsho soo dhaweyn u noqdeen kumanaan kun oo qoysaska dhaqligoodu yar-yahay, waxayna wadiiqo dhaqameed u noqdeen qoysaska qaxootiga ah ee ka yimid koonfur-bari qaarada Aasiya iyo bariga Afrika kuwaasoo u soo haajiray Minisota. Si ka duwan guryaha dadweynaha ee dhaadheer, waa bulsho si gaar ah loogu diyaariyay in ku noolaadaan qoysaska.

Markii Guryo-Magaaleedka Glendale la dhisay, naqshadeeda iyo sifooyinka muuqaalkeedu waxey ahaayeen kuwo la aqbali karo. Hadda oo laga jooga 65 sano ka bacdi, Glendale waxey u soo jeedineysaa bulshada iyo MPHA su'aalo muhiim ah oo adag. Qalabka nidaabka tubooyinka, kuleyliyaha, iyo korontada waa kuwo shaqo ahaan waqtigoodu dhamaadey, siina xumaanayo; tubooyinka Khadadka bulaacadaha dhulka hoostiisa ee qashinka qaada waxey qatar ugu jiraan in guuldareystaan sanadaha soo socda. Naqshada iyo dhismaha guryaha ayaa u keenaya caqabad dhawrida iyo isticmaal-wanaaga tamarta ama korontada. Waxaan xataa filaynaa khariirad ka fiican iyo waxyaabaha guryaha ay qoysaska u baahan yihiin maanta, ay ka mid yihiin qolalka cuntada, musqulaha-dabaqa kowaad, qaboojiyaha dhexe, iyo irdo ka ballaaran midka hada ee 32 cabirka (inches). Intaa waxaa dheer, cutubyada ama qolalka guryaha sidey hada u jiraan, waxey abuurayaan caqabad ah isticmaalka dadka naafada ah.

Qimaynta madax-bannaan oo dhawaan lagu sameeyey xaaladaha dhismaha ee Guryo-Magaaleedka Glendale, waxa lagu ogaadey in loo baahan yahay lacag wadar ahaan gaareysa $15 milyan oo lagama maarmaan ah oo lagu dacyartiro dhismayaasha, oo ay ku jirto dayactir muhiim ee badalida nidaamyada dhismaha iyo kaabayaasha. Haddii aan wax laga qaban, kharashka hagaajinta dhismaha ayaa la filayaa in uu kordho oo gaaro $27 milyan 20 sano ee soo socota. (Isbarbardhig ahaan, miisaaniyada sanadlaha ee dhismayaasha waa ku dhawaad $10 milyan-dhamaan, 5000 ee cutubyada guryaha ee hantida faylka maalgelinta oo ay ku jirto 42 dabaqyada dheerdheer, 730 guryaha qoysaska gooni goonida ah, guryaha labo-labada dabaq ah iyo 184 guryo-magaaleedka Glendale.)

MPHA Hadafka Hawlgalkeedu oo ah-in ay bixiso/ama gaarsiiso guryo tayo-sare leh, oo cimri-dheer sida ugu badan qoysaska daqli-goodu yar yahay oo ugu suuro-galsan,-ayaa nagu qasbaya in aan la qabsano,oo noqono halbuure cusub, oo aan raadino xal muddo-dheer ah. Qorshaheena Istiraatiijayada ee hadda wuxuu sheegayaa in jihada mudnaanta xeelada istiraatijiyada ugu sareysa ee MPHA ay tahay "*in la dhawro isku dhafka faylalka maalgelinta ee guryenta la hirgelinkaro si ay usii ahaato ilo ama asal guryeyn, la awoodi karo, ammaan ah, oo tayo-sare u leh degeneyaasha."* Glendale waa hanti-khayraad qiimo iyo qaayo sare leh. Sababtaas darteed waxan si qoto leh u qiimeynaa guryenta qoyseedka halkaas, waa in aan wada-hadalka ka bilownaa sidii aan ku dhawri lahayn-iyo in laga yaabo in aan xataa ka faa'ideysano fursada mudada dheer ah aan ku gaarsiin karno guryeyn dheeraad ah qoysaska ku jira liiska sugayaasha araajida guryaha.

Waxaan wax ka qaban karnaa su'aalaha qarnigiiba-mar ina soo mara ee aan ka wajaheyno Glendale haddii aan dhamaanteeen wajahno anaga oo isku duuban: Haddii ay noqon lahayd, mas'uuliyiinta gobolka, magaalada, degeneyaasha guryaha, xaafada, iyo MPHA. Waan ognahay in aan anaga kaliyah aan sameyn karin, waxaana ku soo dhaweyneynaa qof walba doodaan loo baahan-yahay oo muhiimka ah.

Caqabadaha Maalgelinta Aasaasiga ah – Sameynta ay ku leedahay Glendale

Tan iyo 1980-yadii, waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD) ayaa kharash ku filan loo qoondeyn. Maxaa yeelay, qoondeymaha Kongareeska ayaa sii yaraanaya, HUD ma awoodo in ay siiso lacag ku filan maamulada guryeynta guud ahaan dalka si wax looga qabto baahiyada kaydka guryaha dadweynaha ee sii duqoobaya ee qaranka. Cilmi-baaristu ama daraasadku waxey muujiyeyn in loo baahan yahay in ka badan $26 bilyan wadanka oo dhan si loogu horumariyo ama loogu dayactiro hantida guryaha dad-weynaha-tiradaasna wey sii korartaa sanad walba.

La'aanta lacagta misaaniyada maal-gelineed waa arin saameyn muhiim leh u ah Guryo-Magaaleedka Glendale. Waliba waxaa ka daba yimid waqtiga hantidaan guryaha balaaraan oo duqo ah oo ka mid ah galka *isku dhafka maalgelinteena.* Maalgelinta Federaalka looma heli karo heerar xaaqiijinaya mudnaanta nidaamyada oo meelmar-hirgelineed u leh degeneyaasha hada iyo kuwa mustaqbalka. Inkastoo aan inaga iyo masuuliyiinta kale ee guryaha aan si joogto ah u sameyno kiis ah baahida qadiyada ka jirta dhamaan hantida guryaha, maal-gelinta ka timaada Kongareeska uma muuqato mid kordhi-doonta. Inkastona, qaar ka mid ah qorshe soo jeedinta sharci-dejinta gobolka ay ku jirtey xaddi weyn oo maal-gelineed Glendale- oona MPHA ay taageeray dadaalkaan-hadana kuwaas waxey keeneen jiiditaan yar ama hore u socod yar marka loo fiiriyo mudnaanta gobolka -oo-dhan ah.

Lacagta kabitaanka dhaqaale ee hawlgalka ee HUD ugu talagasho guryaha dadweynaha-oo ah lacag aan loo isticmaalin dayactir weyn, laakin loo isticmaalo dayactirka yaryar ee hawlaha dayactir socodsiinta (maintenance) -ayaa xitaa iyada noqotey mid aan si buuxda la iskugu hallayn karin sanadihii la soo dhaafay. Taas macnaheedu waxa weeye MPHA ma ka maqna oo kaliyah lacagta dayactirka hantida, waa in aan si aad u adag u shaqeynaa maalin walba si ay u fidino ama u kala gaarsiino lacagta maaliyada howlfulinta oo kooban

gaarsiinaa dhamaan baahida hawlgalka badan ee ka jirta guud ahaan guryaheena. Waxaan ayidsanahay ballanqaadka ah in aan ugu sii wadno dhamaan hantida guryaheena ay ku jiraan guryaha -Glendale- xaalada ugu fiican oo ugu macquulsan ee qoysaska, dadka da'da, iyo dadka kale ee guryaheena degen. Laakiin waxaan ognahay oo maskaxda ku haynaa in gaaritaanka tani ay noqon doonto mid sii dhib badnaanta sanadaha soo socda madaama ay Glendale- oo aan isbadal weyn lagu sameyn- ay noqon doonta in ay dalabto qayb weyn oo khayraadkaas ah.

Inkastoo ay jirto-ama laga yaabo sabab la xariirta-caqabadaha maalgelinta joogtada ah, in sharuucda dawlada federaalka ay ka rabto mas'uuliyiinta guryeynta in ay u hawl-galaan si mas'uulyad leh, qorsheyn iyo qoondeyn mudo dheer ah ee hantida guryaha, dib-u-eegis joogta ah ee kayda muqaalka guryaha, iyo sii shaqeynta hantida guryaha ee mudo dheer, iyo xeelado bedelida iyo dib-boos ugu habeynta ee hantida guryaha.Mid ka mid ah qaybaha kala duwan ee tani waa Qiimeynta Baahida Muqaalka jir'ahaan ee guryaha ee loqaan Physical Needs Assessment, ama "PNA." Halkaan hoose waa bandhig natiijooyinka ugu dambeyey ee warbixinta lagu heley ee Glendale:

- Shaqada Goobta iyo Dhismaha Dibaddiisa: $5,461,300
- Kaabayaasha, Nidaamyada Waa weyn ee guriga: $4,592,300
- Qolalka(Cutubyada) Guryaha la Degen yahay Gudohooda: $4,897,750

Waa in kabdan $15 milyan oo doolar (lagu qiyaasayo in uu ku dhawaad labalaabmayo 20ka sano ee soo socda), wax ka qabashada baahidaan kuma ahan suurto gal miisaaniyaddeena dhismayaasha ee hada-taasoo ah ku dhawaad $10 million sanadkiiba, dhammaan guryaheena oo dhan. Haddii aan la helin ku soo kordhin maalgelin lacageed ee banaanka ee ka timaada dawlada gobolka (taas oo u muuqata mid aan dhaceyn), si la mid ah, maamulada guryaha dadweynaha ee wadanka oo dhan, waa in aan tixgelinaa oo ka baaran degnaa fursadaha aan heli karno sidii maamule guryo ee qarniga 21-kowaad.

Waa Maxay Fursadaha MPHA?

Muuqaalka maalgelinta ee guryaha dadweynaha ayaa aasaas ahaan is beddelay tan iyo xilligii Glendale iyo saraha dhaadheer la dhisay. Si loogu badbaadiyo guryaha la awoodi karo ee qoysaska dakhligoodu aadka u yar ee Glendale, waa in aan ka fakarnaa si loo helo iskaashi; bulshada ah, dadka deegaanka ah, magaalada iyo gobolka, iyo iskaashatada kuwa samafalka iyo kuwa faa'iido-doon ah- kuwaasoo nala wadaaga aragtideena oo miiska inoo keeni kara khayraadka si hawsha u dhacdo.

Waxa ay aragtidan u ekaan doonto waa su'aal ballaadhan-oo furan imikadan. MPHA waxay bilowdey falanqayn fursadahaan bishii November 2015. **Imikadan wax go'aan ah lama gaarin oo ku saabsan fursad walba.**

Falanqaynta fursadaha waxaa hagaya labo ballanqaad ay MPHA ay u sameyneyso dadka daneeya Guryo-Magaaleedka Glendale:

1. MPHA waxa ka go'an in la hubiyo hirgelinta Guryo-Magaaleedka Glendale si ay u ahaadaan guryo bulshadeed u habeysan qoysas kuwaasoo ammaan ah, nadiif ah, oo ayna awoodi karaan dadka hada deggan.

2. MPHA waxa ka go'an tahay in la hubiyo hirgelinta mustaqbalka ee Guryo-Magaaleedka Glendale si 10, 15, 20, iyo 30 sano kabacdi manta ay qoysaka u baahan guryo ammaan ah, nadiif ah, oo la awoodi karo ay halkaas ka heli karaan.

Si loo buuxiyoa labadaan ballanqaad, MPHA ayaa sameynaya falanqayn dheer iyo qiimeynta fursadaheeda. *Tani ma aha habka qarsoodi ah.* MPHA waxey casuumeysaa dadka daneeyayaasha Guryo-Magaaleedka Glendale (dadka deggan Guryo-Magaleedka Glendale Guryo iyo Prospect Park, saraakiisha HUD, iyo saraakiisha gobolka iyo magaalada ee la doortay) inay ku soo biiraan oo ay ka qayb qaataan horumarinta, falanqaynta, iyo qiimaynta.

Su’aalo iyo Jawaabo Guud

Wadahadaladii isbadalka soo socda ee Glendale waxey dhaliyeen su’aalo dhawr ah oo ka yimid degennayaasha iyo xubno dadka ka tirsan bulshadda.

Su'aal: Goormey tani dhici doonta?

> ***Jawaab:*** Wixii isbeddel ah oo laga yaabo inay saamayn ku yeeshaan qoysaska Glendale waxey qaadan doontaa sanado. Waqtigan xaadirka ah, waxba lama qorsheeyn, mana jira waqti cayiman. Jidka loo marayo lacagta maalgelinta ee fursad walba ayaa ah wax adag, oo ku lug leh iskaashato iyo aragtiyo farabadan. Wax isbadal ah oo dhacaya ma jirto iyada oo aan la yeelan wada-hadalka bulsho oo dheeraad ah.

Su'aal: Miyadan hore u go’aansan waxa aad doonaysaan in aad qabataan?

> ***Jawaab:*** Maya, waxaan soo jeedinay uun qaar ka mid ah fikradaha guud si looga doodo, waxaana qabaney aqoon-isweydaarsi aragtiyadeed ee bulshada ah, waxaana wakiilaney soo saarida warbixin baaris ah (oo laga heli karo "Waraaqaheena Macluumaadka Rasmiga ah" ee Glendale), waxaana bilowney si guud in aan u baarno waxa suurogal noqon kara. Si kastaba ha ahaatee, Guddiga MPHA go'aan kama gaarin Glendale, walina ma aqbalin ama ma ayidin midna tallooyinka la soo jeediyey ee dib-nashqadeynta ama dib-u-horu-marinta.

Su'aal: Waa maxay “Warbixinta Sherman"?

> **Jawaab:** Warbixinta, ay diyaarisey Sherman Associates, codsiga MPHA, waxaa ka mid tahay uun hal nooc oo fikrado ah taas oo ku kordhineysa wax wadahadalka la xariira Glendale. Guddiga MPHA ma aysan ansixin ama qaadey warbixinta, ama tallooyinkeeda kasta ee ku dhex jira, mana jiraan qorshe ah in ay sidaa sameeyaan iyo in kale.

Su'aal: Ma aanan idinka maqlin waxba in muddo ah. Maxaa socda?

> **Jawaab:** Sababta oo ah geedi socodkan arinkaan waa mid muddo dheer oo ka fiirsi leh, waana ognahay in mowduucaan in u yahay mid xasaasi ah, waana in aan lagu

degdegin, waxaa laga yaabaa in ay jirto waqti gaar oo ficil la'aan ah. Waxaan had iyo jeer ku faraxsanahay in aan bixino warbixin wixii soo cusboonaada; Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa mararka qaar in xaaladu xasilloon tahay oo aysan jirin wax cusub oo aan idiin soo warbixino ama idiin sheegno.

Su'aal: MPHA maka saareysaa dadka degan Guryo-Magaaleedka Glendale oo banaanka wadada ku tuureysaa?

Jawaab: Maya. MPHA waa hay'ad dadweyne oo:

- Bixiso guryeyn qoysaska dakhligoodu yaryahay;
- Waa xukumo shuruucda Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD);
- Waxey ku hoos shaqeysaa sharciyada xuquuqda dadka degan ee Gobolka Minnesota ';
- Waxaa maamula oo xukuma Golaha Guddiga Wakiilada; iyo
- Waxaana la xisaabtama daneeyayaal kala duwan.

Sida milkiile HUD ah, MPHA waa in ay u hoggaansataa xeerarka HUD ku saabsan kula dhaqanka cadaaladeed ee dadka degeneyaasha ah. Iyadoo la tixraacayo xeerarkaas iyo shuruucdaas, degenneyaasha kuwaas oo buuxiya shuruudaha ku degeen Guryo-Magaaleedka Glendale, oo ah mashruuc gureyn ee qoysaska u habeysan, dadkaas oo u hogaansan heshiiska guriga, lagama saari karo guriga oo jidka looma tuuri karo.

Sidoo kale, qoys kasta oo loo baahan yahay in meel kale la sii dajiyo oo laga wareejiyo Glendale sabab la xariirta dayactirka ama dib-u dhiska, kasoo wali buuxiya sharuudaha u qalmidda, ayaa loo ogalaan doonaa in ay dib-ugu soo guuraan. Shuruudaha u qalmida waxaa ka mid ah waxyaabaha sida dakhliga qoyska iyo tirada qoyska.

Su'aal: Haddii aad sameysaan dib-u-dayactirid ama horumarin, dadka degan guryaha ma in ay ka tagaan inta lagu gudo jiro dhismaha?

Jawaab: Waa suurogal. Si kastaba ha ahaatee, haddii ay siidaa dhacdo MPHA way fahamsan tahay in dadka degen qaar ka mid ah door bidaan in ay sii joogaan. Waxaa naga go'an in ay sahmino xaalado dhismaha oo "wajaheysan", taas oo ay qoysasku ku sii joogi karaan Glendale, inta shaqadu socoto, haddii ay sidaas dadku rajenayaan.

Su'aal: Haddii degeneyaashu si ku meel gaar ah loo raro, kirada bil kasta ay bixiyaan ma kordh doontaa?

Jawaab: Maya. kirada bil kasta ee guryaha dadweynaha, sida ay aasaastay HUD, waa guud ahaan 30 boqolkiiba dakhliga billaha ee la hagaajiyay. Tani ma is badeli-doono ilaa ay HUD badasho mooyaane. Haddii qoys kasta oo deggan la raro, kiradooda bil kasta waxey sii ahaaneysaa 30 boqolkiiba dakhliga la hagaajiyay ee bil kasta. Wax macno ah ma leh haddii degenaha loo raro guryaha dadweynaha ama

guryaha kale ee lagu heli karo barnaamija Section 8-ka ama foojarka lala guurguuri karo.

Su'aal: Haddii dadka degen si ku meel gaar loo raro, ma awoodi karaan inay soo labtaan?

> ***Jawaab:*** Haa, xaaladaha intooda badan. Haddii, sababta la xariirta dib-u-dayactirka ama dib-u-dhiska, dadka degen Guryo-Magaaleedka Glendale ay u baahdaan in ay si ku meel gaar u guuraan, waxay yeelan doonaan fursad ay ugu soo laabtaan Glendale haddii buuxiyaan shuruudaha lagu deggo guryaha bulshada qoysaska iyo guryaha dadweynaha. Shuruudahaas ma is badalayaan sabab la xariirta tilaabooyin dib-u-dayactir ama horumarineed ee MPHA.

Su'aal: MPHA ma ka caawineysaa degeneyaasha in ay helaan guryeyn bedel ah ka hor inta aan la bilaabin dayactirka ama dib-u-dhiska?

> ***Jawaab:*** Haa. Haddii ay lagama maarmaan tahay inay meel kale u guuraan dadka degan Guryo-Magaaleedka Glendale sabab la xariirta dayactirka ama dib-u-dhiska, MPHA wey ka caawin doonaa helitaanka guryeyn bedel ah qoyska kasta kahor inta u ka bilaaban dib-u-dayactirka ama dib-u-dhiska gurigooda ama qolkooda.

Su'aal: MPHA ma si ula kac ah ay u jareysaa hagaajinta joogtada ah ama dayactirka si Guryo-Magaaleedka Glendale ay sii liitaan si loo gaaro heer ah in la dumiyo?

> ***Jawaab:*** Maya. MPHA marna may jaray ama yarayn hawlaheeda dayactirka Guryo-Magaaleed Glendale amase mid ka mid ah hantida kale. In kastoo ay tahay lagama marmaan in la tixgeliyo horumarin joogta ah oo waara ee hantidaan da'da ah, hadana waxaan sii wadi doonaa maalin walba kordhinta tayada noolasha ee Glendale anaga oo isticmaaleyna miisaaniyadeena dayactirka ee hawlgalka iyo raasumaalka.

Su'aal: MPHA ma lee dahay khayraadka ama awood ay ku hesho guryeyn bedel ah haddii dadka degen ay noqoqo in si ku meel gaar ah loo raro? Araajida sugida foojarka Section 8 waa mid awalba waqti dheer, milkiilayaasha guryahana badan ma rabaan in ay aqbalaan foojarka.

> ***Jawaab:*** Haa-iyo xaqiiqdu waxey tahay waa waajib. Sharciga loo yaqaan United States Code 42 USC 4636 ee Kaalmada Rarida iyo Qaadashada hantida ayaa mamnuucaya in qoys guri ay degen yihiin lagararo sabab la xariirta qorshe ama mashruuc ay fulineyso wakaalad dawlada dhehe ama lagu fulinayo maaliyad caawimaad ee dawlada dhehe, ilaa in madaxa hay'ada waxrareyso ay ku qanacsantahay in ay jiraan guryen bedel ah oo u dhigma oo loo heli karo dadkaan. Foojarada Section 8 waa hal fursad uun ay qoysaska ay dooran karaan si ay u isticmaalaan sugnaanshaha helida guryen ku meel gaar ah oo la awoodi karo, hadii la goomiyo sabab la xariirta dib-u-dayactirka ama horumarinta, degeneyaashu ee Guryo-Magaaleedka Glendale waa in si ku meel gaar ah loo raro.

HUD waxay sidoo kale rabtaa in haddii degeneyaashu meel kale loo raro, in qoysaska ay helaan caawin dhaqaale iyo la talin rarida ku saabsan. Qoys kasta wuxuu helayaa kaalmo iyo talo ka-fool ka fool ah uu ku heli lahaa guryen ku haboon oo ku meel gaar ah inta lagu gudo jiro nidaamka dib u habeynta iyo dib-dayactirka.

Sida la xusey, marka dayactirka ama dibu dhiska la dhamaystiro, degeneyaashii lararay waxey awoodayeen in ay dib ugu soo laabtaan Guryo-Magaaleedka Glendale.

Su'aal: Miyeynan MPHA helin lacagta federal ee hagaajinta ama horumarinta ee Guryo-Magaaleedka Glendale? Maxaa ku dhacay in lacagtan?

> ***Jawaab:*** HUD waxey xisaabisaa cadadka lacagta MPHA ay hesho sanad walba si ku saleysan qaacido adag oo aan ka turjumeen baahida dhabta ee guryaheena qaaska ah. Qaacidadu waa hab sahlan ee HUD ugu qaybiso wadarta, ahna qoondo qaranmeed ee maamulada guryaha. Lacagta maalgelinta dayactir ay MPHA u hesho dhamaan guryaha faylkoody waxey gashaa hal maalingelin ee dayactirka. Maalingelintaa dayactirkana waxaa ahmiyad loo kala siiyaa dhaman guryaha oo dhan.

Tirada guud ee lacagta hagaajinta guryaha dadweynaha ay qoondeyaan Kongrayska waa waxaan si dhamaad lahayn oga yar baahida ay xisaabiso HUD, sidaa daraadeed, maalgelinta ay MPHA kaga hesho HUD dib-u-dayactirka guryaha marna kuma filna in ay wax ka qabato dhamaan baahida guryaha oo dhan. Jiritaanka hoos u dhaca, maalgelinta owgeed, MPHA way in ay u qoondeysaa dhaqaalaheeda ugu horeyntii sanad walba guryaha leh baahida ugu degdegsan ee noolasha, amniga iyo kaabayaasha. Sanadihii ugu dambeeyey, tusaale ahaan, MPHA waxey u isticmaashey maalgelinta horumarineed dayactirka wiishashka waa weyn iyo waxa lagu hago, dib-usoo hagaajinta wajiyada hore ee dhismayaasha ee muhiimka ah, nidaamyada tubooyinka iyo hawada gudaha, nidaamyada xakameynta dabka, iyo kamaradaha ammaanka iyo qalabka ilaalada si ay u ilaaliyaan ammaanka dadka deggan. Inkastoo ay MPHA maalgelisay, hada jiritaanka maalgelinta aan ku fileyn micnaheedu waa baahida guryaha ee wax ku oolka wali weyka jirtaa dhamaan faylka guryaheena ay ka mid tahay Glendale.

Su'aal: MPHA ma waxey rabtaa in ay ka iibiso Guryo-Magaaleedka Glendale Maalgeliye horumariye guryaha oo gaar loo leeyahay is hesho lacag dheeraad xisaabtooda bangiga?

> ***Jawaab:*** Ujeedadeeda lama xariirto faa’ido doon ama in hantida cid gaar u yeelato. MPHA waa urur dawladeed oo u jira hal ujeeddo: si ay u bixiso/ama gaarsiiso guryo tayo-sare, oo mudo-dheer shaqeeynaya sida ugu badan qoysaska daqli-goodu yar yahay oo ugu suuro-galsan. Annagu ma sameyno faa'ido ah; lacagna kuma qarashgareyno wax aan ka ahayn hadafka u jeedkeena oo ah in aan u adeegno dadka dhaqligoodu yaryahay ee Miniyabolis oo u baahan guryo, manta iyo mustaqbalka. Hanaan kasta, guryaha Glendale waxey sii haysanayaa ugu yaraan 184 cutubyada (tirade guryaha hada) oo ah guryo si qoto dheer u ahaada guryeynta la kabo ee qoysaska daqligoodu yaryahay.
>
> Muuqaalka maalgelinta ee guryaha dadweynaha ayaa aasaas ahaan is beddelay tan iyo xilligii Glendale. Hadafkeenu hawshiisu wuxuu nagu qasbayaa in aan la qabsano

oo aan noqono hal-abuure cusub, oo aan tixgelino in aan la shaqeyno iskaashatooyinka faa'ido doonka ah iyo kuwa aan faa'idoonka ahayn, iyo waliba mas'uuliyiinta magaalada iyo gobolka, si ay I noogu caawiyaan daboolida baahida muhiim ah ee gureynta qoysaska ee la awoodi karo. Nidaamkaan ma'ahan mid ku saabsan faa'ido u keenis qof walba; waa baahida muhiimka ah ee gureynta qoysaska ee la awoodi karo ee Miniyabolis.

Su'aal: Tani soo qayb ka ma'ahan damaca loo yaqaan "gentrification" oo ah in xaafada laga kaxeeyo qoysaska daqli-goodu yaryahay iyo qaxootiga?

> ***Jawaab:*** Maya. xaqiiqdii, wadahadalkaan waa wuxuu ku saabsan dhawrida helitaanka guryeynta dad daqli-goodu yar-yahay ee Glendale iyo xaafada Prospect Park. Glendale waa hanti-khayraad qiimo iyo qaayo sare leh. Sababtaas darteed waxan si qoto leh u qiimeynaa guryenta qoyseedka halkaas, waa in aan wada-hadalka ka bilownaa sidii aan ku dhawri lahayn-iyo in laga yaabo in aan xataa ka faa'ideysano fursada mudada dheer ah aan ku gaarsiin karno guryeyn dheeraad ah qoysaska ku jira liiska sugayaasha araajida guryaha.

Su'aal: Miyeyna MPHA isticmaali kareyn barnaamijka caashuuraha guryeynta ee dad daqligoodu yaryahay ee loo yaqaan(LIHTC) ee hay'dda dowlada ee addeega daqli aruurinta inay ku horumariyaan Guryo-Magaaleedka Glendale?

> ***Jawaab:*** MPHA, mar hadii ay tahay qayb ka mid ah hay'ada dadweynaha ee dawlada, xaq uma laha in ay ka qayb qaadato barnaamijka LIHTC iyada oo aan qayb ka ahay shirkadaha qaaska loo leeyahay oo rabo in ay ka qayb qaataan horumarinta mashruucyada guryeynta, oo isticmaali kara barnaamijyadan.

Su'aal: Miyeynan dawlada magaalada Miniyaabolis lahayn guryo-magaaleedka Glendale, halkaas oo ay MPHA mas'uul uun ka tahay maamulida iyo shaqeysiinta iyo dayactirida?

> ***Jawaab:*** MPHA ayaa leh Guryo-Magaaleed Glendale, HUD-na waxey haysataa "Qoraalka Bayaanka Aaminaada" (Declaration of Trust) ee guryaha. MPHA waa Chartered si uu u jiro ee magaalada Minneapolis, aan ayaa sharci gaar ah magaalada tan iyo 1991-MPHA la hay'ad kasta oo kale oo ma wadaagaan lahaanshaha Glendale ka. Dawlada Magaalada Miniyabolis ayaa sharci ku aasaastey MPHA si ay u jirto; sharciyan waxaan ka go'neyd magaalada ilaa 1991. MPHA lama wadaagto lahaansha Glendale cid kale.

Waxbadan oo ku Saabsan Qiimeynta, Fallaqeynta iyo Himilooyinka

Madaama aan nahay wakaalada dadweyne oo masuul ah, MPHA hadafkeedu iyo shuruucda HUD ku khasbayaan in ay fallanqeyso oo ay qiimeyso dhamaan fursadaha oo dhan, ay ku jiraan dib-u-habeyn iyo dib-u-dayactir

"Falanqaynta iyo qiimeynta" waxey ka bilaabaneysaa in la aqoonsado fursadaha suurto galka ah. Wakhtigan, ma jirto fursado loo qeexay mustaqbalka Guryo-Magaaleedka

Glendale. Guud ahaan, waxay u muuqataa in fursadaha la tixgelanyo in ay ka mid yihiin dib-u-habeyn, dib-u-horumarin, iyo isku dhaf suurogal ah halkaasoo dib-u-habeynta iyo dib-u-horumarinta la isku daro.

Fursadaha waxaa lagu horumarinayaa tallooyinka ay MPHA ka hesho dadka daneeya iyo dadka awooda degeenka ee muhiim ka ah ee Guryo-magaaleed Glendale oo ay ku jirto tallooyinka yimid aqoon isweydaarsiga aragtida taas oo lagu qaybtey Nofember 2015 Luxton Park iyo isgaarsiinta laga helay kooxa golaha degeneyaasha iyo xaafadaha.

Hawlaha aqoon isweydaarsiga waxey tixgeliyeen waxyaabaha soo socdo, kuwaasoo loo isticmaalayo si loogu cayimo fursadaha:

- Riyooyinka Bulshada
- Ujeedooyinka Bulshada
- Dabaca iyo Hiigsiga Bulshada
- Waxa laga jecelyahay ama lagu necebyahay Guryo-Magaaleedka Glendale
- Jecelyahay iyo wuxuu necebyahay ku saabsan Glendale Guryo jira

Aqoon isweydaarsiga Aragtiga dheer ee ugu horeysey iyo tallooyinka laga helay shirarkii bulshada ee kale iyo isgaarsiinta kala duwaneyd ee la helay waxey inoo suurogalineysaa in aan bilowno aqoonsiga fursadaha iyo fallaqeyta, ku saleysan

aragti hore iyo talooyin ka helay inta lagu guda jiro kulamada kale ee bulshada iyo isgaarsiinta kala duwan helay ayaa inoo ogolaatay in ay bilaabaan aqoonsiga ee fursadaha iyo falanqaynta, saleysnaadaan arrimo ay ka mid tahay:

- kharashka Guud ee Dhismaha Guryaha
- Kharashka hawl-wadiga iyo dayactirka
- Helitaanka kharashka lacagaha loo baahan yahay
- Qiimaha lacagta la heli karo
- Awoodda lagu qancin karo riyooyinka, damaca, iyo hiigsashada
- si ay u qanciso riyooyin, gool, hawadooda, iyo caqiidada
- Awoodda lagu kordhinayo wax la jecelyahay laguna yareenayo wax aan la jeclayn
- Awoodda lagu fiicnaysiinayno is dhexgalka Guryo-magaaleedka Glendale iyo Bay’adda ku hareereysan

Si kastaba ha ahaatee, hanaan socodkaan waa mid weli ku jira marxaladaha hore, Walina waxaa sii wadeynaa wada-tashiga bulshada, fahanka fursadaheena, si waafaqsan shuruucda xeeraadka HUD, waxaana aruurineynaa fahanka aragtiyada mas’uuliyiinta la doortey iyo iskaashatada suurogalka noqon kara. Waxaa imaan doona shirar bulshadeed iyo wada-hadal badan, waxaana idiin siinaynaa ogeysiin ku filan markii ay tani dhacdo. Haddii aan rajeyneyso in aa hesho ogeysiisyo, fadlan isqor oo saxiix adiga oo isticmaalayaa batoonka rukumashada fariimaha Glendale ee "Subscribe to Glendale Emails" ee ku yaal dhinaca gacanta midig ee boggan.